WARBIXINTA SANADLAHA AH EE SANNAD MAALIYADEEDKA FEDERAALKA 2026

La daabacay Nofeembar 2, 2026

Golaha Guddoomiyaha ee Naafonimada Korriinka (Golaha) wuxuu qayb ka yahay shabakadda barnaamijyada Minnesota ee lagu maalgeliyo P.L. 106-402, Xeerka Caawinta Naafonimada Korriinka iyo Xuquuqda Aasaasiga ah (Xeerka DD). Xeerka DD wuxuu sidoo kale maalgeliyaa Xarunta Sharciga Naafonimada Minnesota (hay'adda loo magacaabay ilaalinta iyo u doodista gobolka) iyo Machadka Isdhexgalka Bulshada, oo ah Xarun Jaamacadeed oo Heer Sare ku Takhasustay Naafonimada Korriinka, kuna taalla Jaamacadda Minnesota.

Hawsha Golaha waa inuu bixiyo macluumaad, waxbarasho, iyo tababbar si loo kordhiyo aqoonta, loo horumariyo xirfadaha, loona beddelo fikradaha, taas oo kordhinaysa Madax Bannaanida, Wax soo saarka, Isgo'aaminta, Isdhexgalka, iyo Ka mid Noqoshada Bulshada (IPSII) ee dadka qaba naafonimada korriinka iyo qoysaskooda.

Warbixintan Sanadlaha ah waxay soo koobaysaa natiijooyinka yoolalka barnaamijka Qorshaha Gobolka ee Shanta Sano ee 2022–2026 ee FFY 2026.

XUBNAHA GOLAHA EE HADDA (Nofeembar 2026)

Heather Andersen
Jenny Arndt, Guddoomiye Ku xigeenka Golaha
Luke Bourdeaux
Prince Cole
Daonna Depoister
Jennifer Hall-Lande
Heidi Hamilton
Heather Kainz, Guddoomiyaha Golaha
Joel Liestman
Elizabeth Marsh
Katie McDermott
Lisa McDonough
Chris McVey

Carolyn Perron
Janna Peterson
Mary Raasch
Dan Reed
Ashley Reiff
Jenny Santema
Kaylie Schmidt
Bonnie Jean Smith
Heather Stillwell
Sumukha Terakanambi
Lauren Thompson
Garret Zayic

NATIIJOOYINKA FEDERAALKA (IPSII)

Xeerka DD wuxuu gole gobol kasta u xilsaarayaa inuu horumariyo nidaam dhammaystiran oo udub dhexaad u ah adeeg qaataha iyo qoyska, si dadka qaba naafonimada korriinka looga caawiyo inay gaaraan:

Madax Bannaani: Xorriyadda qofka ee uu wax ku xulan karo, isla markaana uu awood ugu yeelan karo adeegyada, taageerooyinka, iyo caawimaadaha kale ee uu helo.

Wax Soo Saar: Shaqo mushaar leh oo macno leh ama shaqo mutadawacnimo ah oo wax ku biirisa qoyska ama bulshada.

Isgo'aamin: Awoodda go'aannada lagu gaaro, ilooyinka lagu maamulo, laguna horumariyo xirfadaha hoggaaminta qofka.

Isdhexgalka iyo Ka Mid Noqoshada Bulshada: Ka qaybgal buuxa oo lagu yeesho hawlaha bulshada ee ay ka qaybqaataan dadka aan naafonimada qabin.

Golaha wuxuu guusha yoolalka uu maalgeliyo ku cabbiraa heerka uu barnaamij kasta wax uga geysto natiijooyinka IPSII.

NATIIJOOYINKA

Sannadkii 2026, Goluhu wuxuu $1,152,734.00 ka helay Maamulka Nolosha Bulshada ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka. Lacagtaas, 70% waxaa loo qoondeeyey deeqo iyo qandaraasyo lagu fulinayo yoolalka Qorshaha Gobolka ee Shanta Sano ee Golaha, kaas oo ay ansixisay dowladda federaalka.

ISU DOODIDDA

U Doodista Isbeddelka Si Wadajir ah (ACT) iyo Isu Doodayaasha Minnesota (SAM)

Intii lagu jiray sannad deeqeedka 2025–2026, U Doodista Isbeddelka Si Wadajir ah (ACT) iyo shabakadda Isu Doodayaasha Minnesota (SAM) waxay horumariyeen istaraatiijiyad isku dubbaridan oo gobolka oo dhan ah si loo xoojiyo xirfadaha isu doodidda, loo ballaariyo horumarinta hoggaaminta, loona horumariyo xuquuqda aadanaha ee dadka qaba naafonimada korriinka. ACT iyo SAM waxay tababareen isu doodayaal tiradoodu dhan tahay 139 qof, waxaana taageeray 38 isu doode oo u adeegay tababarayaal. Waxay sidoo kale sii kordhiyeen ka qaybgalka deegaannada magaalooyinka iyo miyiga labadaba. Taxanaha Tababarka Sinnaanta Naafonimada (DETS) iyo manhajka xuquuqda aadanaha ee Awoodsiinta Wadajirka ah waxaa lagu bixiyey goobo kala duwan, iyagoo gaadhay dhallinyarada ku jirta da'da kala guurka iyo dadka waaweyn. Mawduucyadu waxay diiradda saareen xuquuqda dadka qaba naafonimada, awoodsiinta qofka, isgaarsiinta, iyo xiriirrada caafimaadka qaba.

Xogta qiimaynta waxay si joogto ah u muujisay qanacsanaan heer sare ah oo ka qaybgalayaasha ah iyo horumar la cabbiri karo oo dhinaca xirfadaha ah. Qiimaynta tababarrada waxay muujisay heerar sare oo waxbarasho, iyadoo dhibcaha aqoonta la kororsaday ay u dhexeeyeen 4.51 ilaa 4.84 marka la adeegsanayo cabbir shan dhibcood ah. Qiimaynta waxtarka tababarka iyo tayada tababarayaasha ayaa iyadana sidaas oo kale ahayd mid aad u sarreysa. Natiijooyinka IPSII ee lagu cabbiro madax bannaanida, wax soo saarka, isgo'aaminta, iyo ka mid noqoshada bulshada ayaa muujiyey natiijooyin xooggan sannadka oo dhan, iyadoo dhibcuhu guud ahaan u dhexeeyeen bartamaha 4.0 ilaa dhammaadka sare ee 4.0. Ka qaybgalayaashu waxay sheegeen inay heleen kalsooni dheeraad ah, inay si weyn uga qaybqaateen hawlaha u doodista, isla markaana ay sare u qaadeen awooddooda ay ku cabbiraan baahiyahooda iyo waxyaabaha mudnaanta u leh. Natiijooyinkani waxay xaqiijinayaan saamaynta joogtada ah ee ACT iyo SAM ku leeyihiin xoojinta dhaqdhaqaaqa isu doodidda ee Minnesota iyo horumarinta yoolalka Golaha ee la xiriira madax bannaanida qofka, ka mid noqoshada bulshada, iyo xuquuqda qofka.

Bixiyaha:

Advocating Change Together, Inc.
1821 University Avenue, Suite 177
St. Paul, MN 55104
https://www.selfadvocacy.org/

Danjireyaasha Ixtiraamka (A4R)

Barnaamijka Danjireyaasha Ixtiraamka (A4R), oo ay maamusho PeaceMaker Minnesota, wuxuu sannad dugsiyeedkii 2025–2026 ballaariyey dadaalladiisa gobolka oo dhan ee ka hortagga cagajuglaynta iyo horumarinta ka mid noqoshada bulshada. Toddoba iyo toban hay'adood oo bahwadaag ah ayaa diyaariyey 140 Danjire oo qaba naafonimada korriinka si ay tababar fasalka dhexdiisa ah u siiyaan ardayda fasalka afraad. Danjireyaasha waxay 51 dugsi ku qabteen 170 kulan oo fasalka dhexdiisa ah, iyagoo gaaray 3,949 arday. Iyagoo adeegsanaya

sheekooyin shakhsiyeed, Danjireyaasha waxay ardayda bareen ka mid noqoshada bulshada, Luqadda Qofka Mudnaanta Siisa, xiriir ixtiraam leh, iyo sida cagajuglaynta si waxtar leh wax looga qabto.

Barnaamijka wuxuu natiijooyin xooggan u soo hooyey Danjireyaasha iyo ardayda labadaba. Danjireyaasha waxay sheegeen inay horumar weyn ka sameeyeen madax bannaanida, wax soo saarka, isgo'aaminta, iyo ka mid noqoshada bulshada, iyadoo dhibcaha IPSII ay ka kordheen celceliskii 2.8–3.3 ee ka hor barnaamijka ilaa 4.3 ka dib ka qaybgalka. Qanacsanaanta barnaamijku waxay gaartay boqolkiiba 100, inta badan ka qaybgalayaashuna waxay sheegeen inay kordheen ka qaybqaadashadooda u doodista, inay horumareen xirfadahooda xiriirka, isla markaana ay si weyn uga qaybqaateen doorarka hoggaaminta. Macallimiinta waxay si joogto ah u xaqiijiyeen in Danjireyaasha ay ardayda si waxtar leh uga qayb geliyeen, gaareen ujeeddooyinkii waxbarashada, ayna tahay inay soo laabtaan sannadaha soo socda. Qiimaynta ardaydu waxay muujisay faham heer sare ah oo ku saabsan fikradaha muhiimka ah, iyadoo ku dhowaad dhammaan ardaydu muujiyeen aqoonta ay u leeyihiin ka mid noqoshada bulshada, u doodista, iyo Luqadda Qofka Mudnaanta Siisa.

Bixiyaha:

PeaceMaker Minnesota
2131 Fairview Avenue North
Suite E
Roseville, MN 55113
http://www.peacemakermn.org

WACYIGELINTA DHAQANKA

Mashruuca Wacyigelinta Dhaqanka ee Autism Sibs Universe wuxuu muddo sannad ah bixiyey hindise tababar oo ku saabsan naafonimada, kaas oo ku salaysnaa dhaqanka looguna talagalay dadka Hindida Aasiyaanka ah ee qaba naafonimada korriinka iyo qoysaskooda ku nool Minnesota. Iyadoo la adeegsanayo waxbarid luqado badan ah, habraacyo tixgelinaya baahiyaha dareemayaasha, iyo taageerooyin ku salaysan fahamka dhaqanka, barnaamijku wuxuu adeegay 62 ka qaybgalayaal oo kala duwan. Laba taxane oo tababarro waaweyn ah oo la qabtay Febraayo iyo Maarso 2026 ayaa lagaga hadlay xuquuqda dadka qaba naafonimada, hagidda adeegyada, shaqaalaynta, tignoolajiyada caawinta, waxbarashada loo dhan yahay, iyo u doodista sharci dejinta. Ka qaybgalayaashu waxay sidoo kale heleen tababbar qof kasta gaar loogu talagalay oo wadartiisu ahayd 52 saacadood, si looga taageero codsiyada adeegyada ka dhaafitaanka, qorshaynta shaqaalaynta, dejinta tignoolajiyada caawinta, iyo isu diyaarinta markhaati ka hor bixinta sharci dejiyeyaasha.

Horumarka laga gaaray natiijooyinkii la hiigsanayey wuxuu ahaa mid la taaban karo. Helitaanka adeegyada ayaa kordhay markii ka qaybgalayaasha loo gudbiyey Partners in Policymaking, laga diiwaangeliyey adeegyada ka dhaafitaanka HCBS, ay heleen adeegyo ka dhaafitaan oo cusub ama la hagaajiyey, isla markaana ay heleen taageerooyin dheeraad ah sida CFSS iyo VRS. Qanacsanaanta ka qaybgalayaashu waxay si joogto ah u ahayd mid sareysa, iyadoo celceliska dhibcaha KUQ uu u dhexeeyey 4.48 iyo 4.54, halka dhibcaha IPSII ay muujiyeen horumar

xooggan oo laga sameeyey madax bannaanida, wax soo saarka, isgo'aaminta, iyo ka mid noqoshada bulshada. Natiijooyinka u doodista iyo hoggaamintuna sidoo kale way sii xoogaysteen, iyadoo dadka qaba naafonimada iyo xubnaha qoysaskoodu ay sheegeen inay kororsadeen xirfadaha u doodista, horumariyeen awoodda ay isku cabbiraan, isla markaana ay si firfircoon uga qaybqaateen hawlaha u doodista iyo doorarka isbahaysiyada. Isku soo wada duuboo, natiijooyinkani waxay muujinayaan horumar weyn oo laga sameeyey aqoonta, helitaanka adeegyada, iyo ka qaybgalka arrimaha bulshada ee deegaanka dhexdiisa.

Bixiyaha:

Autism Sibs Universe
14107 54th Ave North
Plymouth, MN 55446
612-440-9133 | info@asu-living.org

HORUMARINTA HOGGAAMINTA

Yoolka Horumarinta Hoggaaminta ee Golaha waa in la taageero lana horumariyo xirfadaha hoggaaminta ee dadka qaba naafonimada korriinka iyo qoysaskooda, si loogu diyaariyo inay noqdaan u doodayaal, afhayeenno, iyo hoggaamiyeyaal ka dhex shaqeeya dhaqdhaqaaqa ballaaran ee xuquuqda dadka qaba naafonimada.

Sannad kasta, Goluhu wuxuu barnaamijka Partners in Policymaking® ku bixiyaa siddeed kulan oo tababar xooggan ah oo la qabto dhammaadka toddobaadka, kuwaas oo ay hoggaamiyaan khubaro heer qaran ah, dejiyeyaasha siyaasadaha, iyo u doodayaal khibrad leh. Manhajku wuxuu ka hadlayaa taariikhda naafonimada, waxbarashada loo dhan yahay, adeegyada degmooyinka iyo gobolka, shaqaalayn qofka loogu talagalay, guriyeynta, abaabulka bulshada, xirfadaha xiriirka iyo warbaahinta, habraaca baarlamaanka, geeddi socodka sharci dejinta gobolka iyo federaalka, iyo dhaqdhaqaaqa xuquuqda madaniga ah ee dadka qaba naafonimada. Kulamada waxaa ka mid ah shaqo kooxo yaryar ah, dhegaysiyo sharci dejineed oo tijaabo ah, aqoon isweydaarsiyo xiriir, iyo tababar gacanta lagu tijaabinayo agabka u doodista. Hawlahan waxaa si gaar ah loogu talagalay in lagu dhiso kalsoonida, isgo'aaminta, iyo awoodda si wax ku ool ah loogu hago nidaamyada.

Fasalka 43: Bixinta Barnaamijka, Ka Qaybgalka, iyo Natiijooyinka

Fasalka 43 wuxuu sannad barnaamijeedkii 2025–2026 ku bilaabay dhiirrigelin iyo diyaar garow aad u sarreeya oo ku aaddan horumarinta hoggaaminta, waxaana ka qalinjabiyey 31 qof. Kooxdani waxay matalaysay bulshooyin isirro iyo deegaanno kala duwan oo ku baahsan Minnesota, iyadoo 56% ay isku aqoonsadeen inay yihiin dad qaba naafonimada korriinka, halka 44% ay ahaayeen xubnaha qoysaska.

Qiimaynta tababarayaasha Fasalka 43 waxay ahayd mid aad u wanaagsan. Marka la eego aqoonta, waxtarka, iyo tayada guud, kulamadu waxay heleen qiimayn u dhexeysa 4.4 iyo 4.9 marka la adeegsanayo cabbir shan dhibcood ah. Jawaab celinta qoraalka ah waxay ammaantay khibradda soo jeediyeyaasha, ku habboonaanta iyo helitaanka fudud ee nuxurka, iyo agabka wax ku oolka ah ee u doodista ee lagu dhex daray kulan kasta. Cabbirrada IPSII ee la qaaday

barnaamijka ka hor iyo ka dib waxay xaqiijiyeen horumar weyn oo laga sameeyey madax bannaanida, wax soo saarka, ka mid noqoshada bulshada, iyo isgo'aaminta ee isu doodayaasha iyo xubnaha qoysaska labadaba. Xogta natiijooyinka ACL waxay sidoo kale muujisay kororka u doodista, awood xooggan oo lagu aqoonsado baahiyaha, ballaarinta doorarka hoggaaminta, iyo qanacsanaan heer sare ah oo laga muujiyey waayo aragnimada tababarka. Ka qaybgalayaashu waxay marar badan carrabka ku adkeeyeen dareenka xooggan ee bulshonimo ee laga dhex dhisay kooxda, iyagoo inta badan ku tilmaamay "qoys" taageera u doodista, kaas oo xoojiyey waxbarashadooda iyo ka qaybqaadashadooda sannadka oo dhan.

SAAMAYNTA JOOGTADA AH IYO TAN MUDDADA DHEER EE KOOXAHA KALA DUWAN
Xogta dabagalka muddada gaaban ee Fasalka 42 waxay muujinaysaa in natiijooyinka barnaamijka Partners ay sii jiraan. Qalinjabiyeyaasha waxay sii ballaariyeen ka qaybqaadashadooda u doodista, waxay hagaajiyeen xiriirkooda ay la leeyihiin go'aan gaarayaasha, waxayna si dhakhso ah ula wareegeen doorar hoggaamineed oo ka tirsan guddiyada iyo isbahaysiyada gobolka oo dhan. Cabbirrada IPSII waxay sii ahaayeen kuwo sarreeya, qalinjabiyeyaashana waxay lix bilood gudahood fuliyeen boqolaal tallaabo oo u doodis shaqsiyeed ah.

Qiimaynta muddada dheer ee Fasalada 39–41 waxay muujinaysaa in qalinjabiyeyaasha Partners ay sannado badan ka dib dhammaystirka barnaamijka sii ahaadaan hoggaamiyeyaal firfircoon oo wax ku ool ah. Qalinjabiyeyaashii hore waxay sii wadaan ka qaybgalka shabakadaha u doodista, golayaasha la talinta, iyo ururrada bulshada ee gobolka oo dhan. Waxay sidoo kale sheegaan horumar joogto ah oo ku yimaadda xirfadahooda u doodista, hagidda nidaamyada, iyo ka qaybqaadashada isbeddelka siyaasadaha. Qaar badan ayaa barnaamijka Partners ku tilmaama aasaaska socdaalkooda u doodista ee noloshooda oo dhan.

Bixiyaha:
The Odyssey Group
1730 New Brighton Blvd, Suite 104 - #237
Minneapolis, MN 55413
https://www.theodysseygroup.com/

SHAQADA

Intii lagu jiray sannad warbixineedka, MSS waxay horumarisay hadafkeeda ah inay ballaariso fursadaha shaqo ee tartanka leh, iskuna dhafan ee loogu talagalay dadka qaba naafonimada korriinka. Sagaal iyo toban qof oo waaweyn iyo arday ku jira da'da kala guurka ayaa helay shaqooyin cusub, iyagoo ku dhowaaday yoolka sannadlaha ah ee barnaamijka oo ahaa labaatan qof. Natiijooyinka shaqaalayntu waxay ka sarreeyeen filashooyinka marka la eego saacadaha shaqada iyo mushaarka labadaba. Ka qaybgalayaashu waxay shaqeeyeen celcelis ahaan afar iyo labaatan saacadood toddobaadkii, taas oo ka sarreysa bartilmaameedkii labaatanka saacadood ahaa, waxayna heleen celcelis ahaan mushaar saacadle ah oo dhan toddoba iyo toban doollar, kaas oo aad uga sarreeya yoolkii ugu yaraa ee ahaa toban doollar saacaddii. Laba qof oo ku cusbaa suuqa shaqada ayaa tusaale u ahaa natiijooyinkan, iyagoo helay jagooyinka Kaaliyaha Wax Soo Saarka iyo Kaaliyaha Adeegga Macaamiisha, waxayna saacaddii kala heleen shan iyo toban doollar iyo lix iyo toban doollar iyo konton senti.

MSS waxay sidoo kale ballaarisay xiriirka ay la leedahay loo shaqeeyayaasha. Ururku wuxuu sannad deeqeedka la sameeyey loo shaqeeyayaasha 313 xiriir, taas oo si weyn u ballaarisay fursadaha horumarinta shaqooyinka iyo bahwadaagnimada. Ka qaybgalka mutadawiciintu wuu sii kordhay, iyadoo la diiwaangeliyey in ka badan 50,000 oo saacadood oo ka qaybgal bulsho ah, taas oo ku dhowaad 15,000 oo saacadood ka badan sannadkii hore. Waayo aragnimadan mutadawacnimo waxay xoojisay horumarinta xirfadaha, ka mid noqoshada bulshada, iyo waddooyinka loo maro helitaanka shaqo.

Ururku wuxuu sidoo kale barnaamijka Co-Collegiate ku horumariyey ka mid noqoshada waxbarashada dugsiga sare ka dib. Ardayda ka qaybqaadatay taageerooyinkan waxay muujiyeen horumar la cabbiri karo oo laga sameeyey dhammaan qaybaha IPSII—Madax Bannaanida, Wax Soo Saarka, Isgo'aaminta, iyo Isdhexgalka/Ka Mid Noqoshada Bulshada. Celceliska dhibcaha qayb kasta si weyn ayuu u kordhay, isagoo gaaray 4.60 ama ka sarreeya marka la adeegsanayo cabbir shan dhibcood ah. Horumarradani waxay muujinayaan koror macno leh oo ku yimid kalsoonida, madax bannaanida, ka qaybgalka, iyo awoodda ardayda ee ay ku hagaan deegaannada waxbarasho ee loo dhan yahay.

Bixiyaha:
MSS
900 Ocean Street
St. Paul, MN 55106
https://www.mssmn.org/

SHIRARKA TABABARKA

Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2026, Golaha Guddoomiyaha Minnesota ee Naafonimada Korriinka (GCDD) wuxuu taageeray shirar tababar oo dhammaystiran oo loogu talagalay in lagu xoojiyo madax bannaanida, wax soo saarka, isgo'aaminta, isdhexgalka, iyo ka mid noqoshada bulshada ee dadka qaba naafonimada korriinka. Iyadoo loo marayo habraac dib u eegis tartan leh, Goluhu wuxuu helay lix iyo toban codsi, wuxuuna ansixiyey maalgelinta kow iyo toban barnaamij. Isku soo wada duuboo, hindisayaashani waxay gaareen in ka badan 870 qof oo ka soo qaybgalay, kuwaas oo ay ku jireen dadka qaba naafonimada korriinka, xubnaha qoysaska, daryeel bixiyeyaasha, xirfadlayaasha, iyo bahwadaagta bulshada. Qanacsanaanta macaamiisha ee dhammaan barnaamijyadu waxay si joogto ah u ahayd mid sareysa, iyadoo celceliska inta badan qiimaynta aqoonta, waxtarka, iyo tayada (KUQ) uu u dhexeeyey 4.5 iyo 5.0 marka la adeegsanayo cabbir shan dhibcood ah.

Hal abuurka iyo ka sheekaynta waayo aragnimada qofka ayaa sii ahaa meel si weyn diiradda loo saaray. Accord, Living Well Disability Services, iyo Cow Tipping Press waxay bixiyeen saddex barnaamij oo qoraal hal abuur leh, kuwaas oo gaaray ku dhowaad 30 ka qaybgalayaal oo kala duwan oo qaba naafonimada korriinka. Natiijooyinka sahanku waxay muujiyeen koror weyn oo ku yimid kalsoonida, xiriirka, iyo ismuujinta qofka, iyadoo cabbirrada IPSII ay caadi ahaan heleen dhibco u dhexeeya 4.0 iyo 5.0. Ka qaybgalayaashu waxay si joogto ah u sheegeen inay ku faanayaan daabacaadda shaqadooda iyo inay heleen awood cusub oo ay qoraalka ugu adeegsan karaan inay naftooda ugu doodaan.

Tababarka u doodista wuxuu ahaa qayb kale oo weyn oo maalgelinta ka mid ah. Koorsada Fraser ee U Doodista Naafonimada oo Ficil ah waxaa ka qaybqaatay in ka badan 95 qof oo si toos ah ama duubis ahaan u daawaday. The Arc Minnesota waxay tababartay 56 isu doode iyo xubnaha qoysaska ah, kuwaas oo markii dambe ka qaybgalay Maalinta Naafonimada ee Xarunta Sharci dejinta Gobolka. Natiijooyinka IPSII ee labada barnaamijba waxay muujiyeen horumar xooggan oo laga sameeyey isgo'aaminta, ka qaybgalka arrimaha bulshada iyo dowladda, iyo awoodda lagu gudbinayo waxyaabaha qofka mudnaanta u leh. Mashruuca U Doodista Sharciga Waxbarashada ee SMRLS, inkasta oo ay tiro yar si toos ah uga soo qaybgashay, haddana duubisyadiisa ku saabsan xuquuqda sharciga ah waxaa onleen ka daawaday 44 qof oo dheeraad ah, wuxuuna bixiyey helitaanka macluumaadka waxbarashada gaarka ah oo laba luqadood ah.

Hindisayaasha caafimaadka, badbaadada, iyo taageerada qoysasku waxay sidoo kale gaareen dad aad u tiro badan. Shirka gobolka oo dhan ee Autism Society of Minnesota wuxuu adeegay 267 ka qaybgalayaal, isagoo bixiyey waxbarid fogaan arag oo tayo sare leh iyo taageerooyin ballaaran oo fududaynaya helitaanka adeegyada. Shirka daryeel bixiyeyaasha ee Proof Alliance wuxuu adeegay 229 ka qaybgalayaal, isagoo bixiyey barnaamij si heer sare ah loo qiimeeyey oo diiradda lagu saaray daryeelka tixgelinaya dhaawaca maskaxeed, u doodista dugsiga, iyo fayo qabka daryeel bixiyeyaasha, iyadoo celceliska dhibcaha KUQ uu u dhexeeyey 4.8 iyo 4.9. Special Olympics Minnesota waxay gaartay 36 ciyaartoy iyo xubnaha qoysaskooda ah, waxayna soo sheegtay horumar xooggan oo laga sameeyey IPSII iyo koror weyn oo ku yimid kalsoonida u doodista ee 32 qof oo sahanka ka jawaabay.

Tababarka tixgelinaya dhaqanka waxaa lagu xoojiyey Taxanaha Awoodsiinta Qoyska ee Waxqabadka Hore ee HealthEQ Solutions, kaas oo qoysaska ku taageeray barnaamij fogaan arag ah oo ka koobnaa afar kulan. Dhammaan dhibcaha KUQ waxay u dhexeeyeen 4.67 iyo 5.0, ka qaybgalayaashuna waxay carrabka ku adkeeyeen inay kordheen fahamkooda waddooyinka korriinka iyo awooddooda ay ugu doodaan nidaamyada caafimaadka iyo waxbarashada dhexdooda.

Tababarka badbaadada qofka iyo xuduudaha gaarka ah ee ay bixisay Highland Friendship Club wuxuu gaaray kooxdii ka qaybgalayaasha, isagoo keenay natiijooyin aad u wanaagsan. Celceliska dhibcaha sahanku wuxuu u dhexeeyey 4.65 iyo 4.8, ka qaybgalayaashuna waxay sheegeen inay horumariyeen xirfadahooda xiriirka, si cad u fahmeen oggolaanshaha, isla markaana kororsadeen kalsoonida ay ku aqoonsanayaan xaaladaha aan badbaadada lahayn.

Istaraatiijiyadda Golaha ee maalgelinta wadajirka ah ee munaasabadaha gobolka oo dhan, kuwaas oo lagu qabtay qaab fool ka fool ah, fogaan arag ah, iyo qaab isku dhafan, waxay noqotay mid wax ku ool u ah ballaarinta helitaanka iyo wax ka qabashada baahiyaha kala duwan ee bulshada.

CILMI BAARISTA MACAAMIISHA

Intii lagu jiray Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2026, MarketResponse International waxay sahan ku samaysay qalinjabiyeyaasha barnaamijka Partners in Policymaking si loo ururiyo waayo aragnimadooda iyo sheekooyinkooda gaarka ah, looguna diyaar garoobo sannad guurada 40aad ee barnaamijka oo ku beegan Maajo 2027. Wadarta 145 qalinjabiye ayaa ka jawaabay sahanka, kuwaas oo ay ku jireen 78 waalid oo u dooda, 48 isu doode, iyo 14 xubnood oo qoysaska u dooda.

Dadka sahanka ka jawaabay waxay matalayeen noocyo badan oo naafonimo ah. Qalinjabiyeyaashu waxay ka kala yimaadeen sannado fasallo kala duwan, iyadoo 14 fasal uu mid kasta matalayey saddex ama in ka badan oo ka jawaabay sahanka.

Sheekooyinka qalinjabiyeyaashu waxay muujinayeen saamaynta qotada dheer ee waarta ee barnaamijka Partners in Policymaking ku yeeshay noloshooda iyo bulshooyinkooda. Qaar badan ayaa xusuustay saamaynta weyn ee ay ku yeelatay markii ugu horreysay ee ay barteen taariikhda naafonimada, iyagoo ku tilmaamay baraarug u caddeeyey ujeeddadooda u doodayaal ahaan. Waalidka u dooda iyo isu doodayaashu waxay wadaageen waayo aragnimo noloshooda beddeshay, laga bilaabo helitaanka kalsoonida ay kaga hadlaan kulamada IEP, ka noqoshada go'aannada adeegyada loogu diiday, ilaa helitaanka shaqo ama nolol madax bannaan. Qaar kale waxay carrabka ku adkeeyeen muhiimadda bulshada ay ka dhex heleen barnaamijka Partners, iyagoo ka sheekeeyey ardaydii ay isku fasalka ahaayeen ee is taageeray, noqdayna xulafo nolosha oo dhan ah. Qalinjabiyeyaal badan ayaa sharaxay dadaallo guulaystay oo lagu horumarinayo fududaynta helitaanka, saamayn loogu yeelanayo sharci dejinta, ama lagu qabanayo doorar hoggaamineed oo ka dhex jira dugsiyada, ururrada aan faa'iido doonka ahayn, iyo golayaasha gobolka. Isku soo wada duuboo, sheekooyinkani waxay muujinayaan sida barnaamijka Partners uu dadka ugu qalabeeyo xirfadaha, aqoonta, iyo kalsoonida ay ku abuuri karaan isbeddel macno leh.

Bixiyaha:

MarketResponse International
https://marketresponse.com

DAABACAADAHA, WAXBARASHADA ONLEENKA AH (FOGAAN ARAGGA), IYO MAREEGAHA INTERNETKA

Intii lagu jiray sannad warbixineedka, Goluhu wuxuu horumariyey yoolkiisa isagoo soo saaray, cusboonaysiiyey, isla markaana qaybiyey ilooyin badan oo dhijitaal ah iyo kuwo daabacan oo taageeraya u doodista dadka qaba naafonimada, horumarinta hoggaaminta, iyo waxbarashada dadweynaha. Ilooyinkan waxaa si weyn loo sii isticmaalayey, waxaana loo arkayey kuwo qiimo sare leh, sida ay xaqiijiyeen xogta qanacsanaanta macaamiisha iyo dib u eegis madax bannaan oo lagu barbardhigay heerarka la aqoonsan yahay.

Daabacaadaha

Golaha wuxuu sii waday oo ballaariyey daabacaado dhammaystiran oo ka hadlaya xuquuqda dadka qaba naafonimada, habraacyada qofka udub dhexaadka u yahay, diiwaangelinta taariikhda, qorshaynta xaaladaha degdegga ah, iyo horumarinta hoggaaminta. Ilooyinka muddada dheer la isticmaalayey sida AÁ's My Choice, Making Your Case, Partners in Policymaking Handbook, InVisibility, iyo agabka qorshaynta xaaladaha degdegga ah ayaa la sii qaybiyey, si joogto ahna looga isticmaalaa gobolka oo dhan. Ilooyinka dokumenteriga ah, oo ay ku jiraan The Unfinished Journey iyo ururinta taariikhiga ah sida Hadamar, ayaa la diyaariyey si ay u taageeraan waxbaridda, tababarka, iyo wacyigelinta dadweynaha.

Koorsooyinka Onleenka ah (Fogaan Arag)

Koorsooyinka onleenka ah (fogaan aragga) ayaa si weyn dib loogu habbeeyey intii lagu jiray Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2026, taas oo muujinaysa sida ay Golaha uga go'an tahay saxnaanta, fududaynta helitaanka, iyo horumarinta joogtada ah. Koorsooyinka la cusboonaysiiyey waxaa ka mid ahaa *Making Your Case, Partners in Time, Partners in Education,*

P*artners in Living, iyo Partners in Employment*. Dhammaan koorsooyinka waxaa lagu daray hagayaal cusub oo loogu talagalay isticmaalayaasha, tixraacyo la saxay, sawirro la cusboonaysiiyey, iyo nuxur la casriyeeyey. Nuqullada ku qoran luqadda Isbaanishka ayaa weli la heli karay ka dib markii hore loo soo saaray. Cusboonaysiinta koorsooyinka waxaa loo qorsheeyey inay sii socoto ilaa Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2027. Jawaab celinta macaamiishu waxay sii ahayd mid aad u wanaagsan: boqolkiiba 90.9 dadka sahanka ka jawaabay waxay sheegeen in koorsooyinku ahaayeen kuwo waxtar leh ama caawiyey, heerarka qanacsanaantuna waxay si joogto ah ugu sarreeyeen dhammaan kooxaha bulsheed. Wadarta 584 qof ayaa iska diiwaangeliyey koorsooyinka onleenka ah intii lagu jiray Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2026.

MAREEGAHA INTERNETKA

Mareegaha internetka ee Golaha waxay ahaayeen goobo muhiim ah oo dadweynaha ka heli karaan waxbarasho, ilaalinta taariikhda, u doodis, iyo ka qaybgal. Nuxurka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiinayey si loo soo bandhigo munaasabadaha waaweyn ee la xiriira naafonimada, filimada dokumenteriga ah, xilliyada faallooyinka dadweynaha, iyo koorsooyinka cusub ee la soo saaray. Cusboonaysiinta muhiimka ah ee mareegaha waxaa ka mid ahaa dib u hawlgelinta mareegta Disability Justice, oo lagu soo kordhiyey hagid la hagaajiyey, fududayn helitaan oo la xoojiyey, tixraacyo sharci oo la saxay, sawirro la cusboonaysiiyey, iyo nuxur la ballaariyey. Mareegta Treat People Like People ee la cusboonaysiiyey waxay noqotay mid si weyn u dhiirrigelisa ka qaybgalka intii lagu jiray Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2026.

Ilooyinka taariikhiga ah, oo ay ku jiraan With an Eye to the Past, With an Eye to the Future, iyo Parallels in Time, ayaa dib loo eegay lana horumariyey, iyagoo taageeraya hawsha joogtada ah ee Golaha ee ilaalinta iyo faafinta taariikhda xuquuqda dadka qaba naafonimada. In ka badan 685 muuqaal oo taariikhi ah ayaa hadda laga heli karaa onleenka (fogaan aragga), iyadoo dhowr ka mid ah muuqaalladaas ay heleen daawadayaal tiro badan. Muuqaallada gaagaaban ee ay soo saartay Mastcom waxay xayaysiiyeen hindisayaasha iyo filimada dokumenteriga ah ee muhiimka ah. In ka badan 2.7 milyan oo dukumeenti ayaa la soo dejiyey sannadkii la soo dhaafay.

Bixiyaha:

Mastcom

5775 Wayzata Boulevard, Suite 700

St Louis Park, MN 55416

www.mastcom.com

HORUMARINTA TAYADA

Hawsha Horumarinta Joogtada ah ee Tayada (CQI) ee Golaha intii lagu jiray Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2026 waxay diiradda saartay xoojinta naqshadaynta udub dhexaadka u ah isticmaalaha, horumarinta habraacyada qiimaynta, iyo adeegsiga hababka nidaamsan ee horumarinta tayada dhammaan hawlaha Golaha. Goluhu wuxuu sii waday adeegsiga Shuruudaha Baldrige ee Heerka Sare ee Waxqabadka, isagoo uga dhigan qaabdhismeedka guud ee lagula socdo waxqabadka, lagu hagaajiyo hawlaha, isla markaana la waafajiyo shuruudaha federaalka ee hoos yimaadda Xeerka Casriyeynta Waxqabadka iyo Natiijooyinka Dowladda ee 2010.

Intii lagu jiray Sannad Maaliyadeedka Federaalka 2026, Goluhu wuxuu la bahoobay MH Consulting si loo fuliyo mashruuca sannadkaas ee Horumarinta Joogtada ah ee Tayada (CQI) ee udub dhexaadka u ah isticmaalaha. Mashruucu wuxuu diiradda saaray samaynta cashar waxbarasho oo loogu talagalay in taariikhda naafonimada lagu dhex daro fasallada cilmiga bulshada ee xannaanada carruurta ilaa fasalka 12aad (K–12), iyo sidoo kale goobaha waxbarashada ee bulshada ku salaysan. MH Consulting waxay fududaysay naqshadaynta, tijaabinta, iyo dib u habaynta casharka iyadoo loo marayo laba weji oo kooxo dood wadaag ah, kuwaas oo ay ku jireen dadka qaba naafonimada korriinka, xubnaha qoysaska, iyo u doodayaasha. Ka qaybgalayaashu waxay bixiyeen jawaab celin qoto dheer oo ku saabsan saxnaanta nuxurka, fududaynta helitaanka, saamaynta shucuureed, caddaynta, qaabdhismeedka, iyo fudaydka isticmaalka.

Fikradihii laga helay Wejiga I ayaa horseeday dib u habayn ballaaran, oo ay ku jireen ku darista muuqaallo ay dadku kaga sheekaynayaan waayo aragnimadooda, horumarinta sawirrada iyo jadwallada taariikhda, adeegsiga luqad qofka udub dhexaad u yahay, xoojinta hagidda fududeeyaha, iyo caddaynta erayada loogu talagalay dadka da’da yar. Qiimayntii Wejiga II waxay xaqiijisay in dib u habayntani ay si guul leh u horumarisay tayada iyo ka jawaabidda baahiyaha isticmaalayaasha. Ka qaybgalayaashu waxay agabka siiyeen qiimayn sare, waxayna xaqiijiyeen in casharka dib loo naqshadeeyey uu diyaar u yahay in dadweynaha loo soo bandhigo. Casharka Barashada Taariikhda Naafonimada waxaa si rasmi ah loo bilaabay Agoosto 5, 2026, iyadoo ogeysiisyadu gaareen in ka badan 12,000 oo qof oo ku biiray liiska ogeysiisyada iyo taageerayaal ku kala sugan GovDelivery iyo Facebook.

Bixiyaha:

MH Consulting Group
1111 3rd Street North
Stillwater, MN 55082

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir:

Minnesota Governor's Council on Developmental Disabilities
Department of Administration
50 Sherburne Avenue Room G10
St. Paul, MN 55155
https://mn.gov/mnddc and **https://mn.gov/mnddc/pipm**
Taleefon: 651-296-4018
Khadka bilaashka ah: 877-348-0505
Email: **admin.dd.info@state.mn.us**

Qaab Kale:

Dukumeentigan waxaa lagu heli karaa qaabab kale adigoo xafiiska Golaha kala xiriiraya cinwaanka kor ku xusan. Fadlan wac 651-296-4018 ama isticmaal bixiyaha adeegga isgaarsiinta ee aad doorbidayso. Ama fadlan isticmaal cinwaanka iimaylka **admin.dd.info@state.mn.us**

Afeef:

Warbixintan waxaa qayb ahaan lagu taageeray deeqda lambarkeedu yahay 2601MNSCDD oo ka timid Maamulka Nolosha Bulshada ee Maraykanka, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Washington, D.C. 20201. Dadka iyo hay'adaha fuliya mashaariic ay dowladda maalgeliso waxaa lagu dhiirrigeliyaa inay si xor ah u muujiyaan natiijooyinkooda iyo gunaanadkooda. Sidaas darteed, aragtiyaha ama fikradaha lagu sheegay warbixintan khasab ma aha inay matalaan siyaasadda rasmiga ah ee ACL.